

# Magacow qof soo galooti ah oo isbadal keenay

Juun 28, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Magacaabidu waxay u furan tahay Abaal marinta Aqoonsiga Dadka dhawaan yimid ee Alberta, oo sharafta muhaajiriinta sameeya wax ku biirin muuqata bulshadeenada.

Qof kasta ayaa magacaabi kara qof dhawaan yimid oo ku xoojiyay gobolka dhexda hawla mutadawacnimada ah, hogaaminta, samaynta qaababka isbeddelka ganacsiga, ka guul gaadhida qaybahooda tacliinta ama xirfadeed, ama samaynta bulshooyin soo dhawayn leh oo loo dhan yahay.

Qaybaha abaalmarintu waxay aqoonsanaysaa guulaha dhalinyarada, dumarka, waayeelka, hal abuureyaasha ganacsiga, mutacalimiinta, xirfadleyaasha iyo dhiseyaasha bulshada. Ilaa laba qof oo la magacaabay ayaa lagu abaalmarin karaa qayb kastsa.

“Alberta waa mid xooggan sababtoo ah muhaajiriinta fara badan kuwaas wax ku biiriya bulsho ahaan dhaqaale ahaan iyo dunta dhaqameed ee gobolkayaga. Dadka dhawaan yimid waxay keenaan fikrado, xirfado iyo hibooyin cusub. Waxay buuxinayaan gaabiska dhanka suuqa xoogsiga ah, waxay bilaabaan ganacsigooda waxayna kaalin firfircooni qaatayn xaafadahooda, dugsiyada iyo goobaha shaqada. Waa muhiim in aan wakhti ku bixino sharfida shakhsiyadkaan xusida mudan.”

*Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamo Kala duwanaanshaha*

Soo gudbinta waxaa lagu qiimeeyaa iyaddoo ku salaysan heerka qiimaynta sida tabaruca guud ahaaneed ee qofka la magacaabo, sida falalkooda u dhammaystiraan baahida iyo u saamayso kuwa kale, iyo sida ay u soo bandhigaa hogaanka iyo asal ahaanshaha marka la xalinayo dhibaato.

Magacaabista waxaa lagu aqbalayaa degel onleen ah. Taariikhda loo qabtay in la codsado waa Luulyo 31.

Barnaamijka abalmarintu waa mid ka mid ah qorshayaasha dowladda lagu caawinayo u wareegida qofka dhawaan yimid inuu u wareego nolosha gudaha Alberta oo awood loogu siiyo dadka Alberta degen inay isla wadaagaan kala duwanaanshahooda iyo dhaqamada kuwa kale.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Magacaabistu waa ay furantahay ilaa Luulyo 31.
- Abaalmarintu waxay isugu jiraan sagaal qaybood: Waxtarka Xirfadda iyo Tacliinta ah, Awoodaha Hal abuurka ganacsiga, Goobaha shaqada ee Loo dhanyahay, Hormuudka Qofka dhawaan yimid, Abaalmarinta Dadka da'da ah, Huromarinta Bulshada Yar, Dhiirigalinta Ardayda, Saamaynta Dumarka Qofka dhawaan yimid, iyo Hogaamiyaha Da'yarka ah.
- Magacaabisyada waa in lagu soo gudbiyaa nidaam onleen ah.
- Si uu ugu qalmo, qofka la magacaabayo waa in uu:
  - ahaadaa shakhsi kaliya (uunu ahayn koox ama urur)
  - aanu ka helin mid la mid ah abaal marinta Dowladda Alberta
  - uu ku dhashay meel ka baxsan Canada (laakiin uu ku noolaa Canada sannado fara badan)
  - ahaadaa qof si rasmi ah u degan ama muwaadin ah reer Kanada ah
  - aanu lahayn xukun fal dambiyeed lagu qaaday kaasoo oo aan cafis laga helin
  - aanu ahayn sarkaal lasoo doortay
  - in uu daganyahay Alberta marka la magacaabayo
  - wax u taray Alberta

## Macluumaadka la xiriira

- [Abaal marinta Aqoonsiga Dadka dhawaan yimid Alberta](#)

## Warbaahinta kala duwan

- [Fiiidyowga Abaalmarinta Aqoonsiga Dadka Dhawaan yimid Alberta](#)